



## XAQIIQOYINKA DEGDEGA AH

# Muddooyinka Diiwaangelinta

**Wakhtiga sanadka marka aad isku diiwaangelin karto qorshaha caafimaad iyaddoo ku xidhan nooca qorshaha caafimaad ee aad u qalanto.**



**Onlayn ka ah**  
[nystateofhealth.ny.gov](http://nystateofhealth.ny.gov)



**Telefoon ahaan lambarkan**  
 1-855-355-5777

**TTY**  
 1-800-662-1220



**U booqo qof ahaan**  
 Caawiyaha

Gobolka NY ee Caafimaadka waxa uu u hogaansamaa sharciyada madaniga federaalka ee ansaxa ah oo uma takooro qaabka isirka, midabka, asalka qaranka, sinjiga, da'da ama naafanimada barnaamijyadeeda caafimaadka iyo hawlaha.

## Sababtee ayaad isugu diiwaangelinaysaa qorshaha caafimaad iyaddoo la marayo NY State of Health?

Waxaa jira sababo badan oo la isugu diiwaangeliyo caymiska caafimaadka oo NY State of Health waxay fududaysaa in la iibsado oo la isugu diiwaangeliyo mid dhammaystiran, oo daboolidda kharshkeedu hooseeye ah. Waxaa jira qorshe caafimaad oo badan oo laga dooranayo. Waxaad caawimo ka heli kartaa caawiye tababaran. Oo, waxaad u qalmi kartaa daboolida kharashka bilaashka ah ama caawinta bixinta daboolida kharashkaaga.

## Qorshayaal noocee ah ayuu NY State of Health bixiyaa?

NY State of Health waa meesha laga iibsado oo la isugu diiwaangeliyo **Medicaid, Child Health Plus, Qorshaha Lama huraanka, iyo Qorshayaasha Caafimaad ee loo Qalmo**.

## Goormaan is diiwaangelin karaa?

Marka aad is diiwaangelin kartaa waxay ku xidhantahay barnaamijka aad u qalanto, kaas oo ku salaysan da', dakhli iyo asbaabo. Diiwaangelintu waxay furantahay sanadkoo dhan haddii aad u qalanto:

- Medicaid
- Child Health Plus
- Qorshaha Lama huraanka

Waxaad isku diiwaangelin kartaa **Qorshayaasha Caafimaad ee loo Qalmo** wakhtiga lagu jiro Muddada Diiwaangelinta Sanadlaha ah, ama Muddada Diiwaangelinta Gaarka ah, haddii aad u qalanto.

Hindi Maraykan iyo Qofka U dhashay Alaska waxa uu is diiwaangelin karaa wakhti kasta muddada sanadka barnaamij kasta oo NY State of Health.

## Waa maxay Muddada Diiwaangelinta Furan?

Muddada Diiwaangelinta Furan waa wakhti sanadka ah oo xadidan – caadi ahaan Noofambar ilaa Janaayo – marka aad isku diiwaangelin karto Qorshayaasha Caafimaad ee loo Qalmo. Haddii aanad is diiwaangelin muddada bilahan, waxaad u baahan doontaa in aad sugto ilaa Muddada Diiwaangelinta Furan ee xigta. Waxaa jira qaar ka reeban. Waxaad awood u yeelan kartaa in aad isku diiwaangeliso Qorshayaasha Caafimaad ee loo Qalmo ee ka baxsan Muddada Diiwaangelinta Furan haddii aad u qalanto Muddada Diiwaangelinta Gaarka ah.

## Waa maxay Muddada Diiwaangelinta gaarka ah?

Muddada Diiwaangelinta Gaarka ah waa marka qof uu leeyahay dhacdo nolol gaar ah (loogu yeedhi “U qalmida Dhacdada Nolosha”) taas u suuragelisa in ay isku diiwaangeliyaan ama ay ku beddelaan kharashkooda daboolida Qorshayaasha Caafimaad ee loo Qalmo ee ka baxsan Muddada Diiwaangelinta.

## Maxay U qalmida Dhacdada Noloshu uga dhigi kartaa qof in uu u qalmo Muddada Diiwaangelinta gaarka ah?

U qalmida Dhacdada Nolosha waxaa ka mid ah:

- Waayitaanka caymiska caafimaad (sababo aan ahayn in aanad bixin caymiskaaga)
- U guurida had iyo jeer ah ee Gobolka New York ama guurida gobolka dhexdiisa taas oo adiga kuu diyaarisa qorshayaasha caafimaad ee cusub
- Guurka ama iskaashiga guriga (waa inaad lahayd daboolid kale gudaha 60kii maalmood ee la soo dhaafay)
- Furitaanka ama kala maqnaansho sharci ah
- Uurka uu xaqiijiyay dhakhtar daryeelka caafimaad ah
- Dhalasho ama korsiga ilmaha, ama ku meelaynta ilmaha daryeelka korinta ah
- Noqda mid u qalma ama aan u qalmin caawimada lacag ka bixinta daboolida kharashka Qorshayaasha Caafimaad ee loo Qalmo
- Noqoshada muwaadin, wadani ama shakhsi sharci ahaan ku jooga

Guud ahaan, waa in aad uga warbixisaa U qalmida Dhacdada Nolosha NY State of Health 60 maalmood gudahood. Waxaad u baahan kartaa inaad bixiso caddyanta U qalmida Dhacdada Nolosha ee qorshahaaga caafimaadka cusub ama Gobolka NY ee Caafimaadka.

## Sideen ku ogaan doonaa ka uu yahay barnaamijka aan u qalmaa?

Waxaa jira saddex hab oo fudud oo lagu ogaado haddii aad u qalanto daboolida kharashka caafimaadka:

- Onlayn ahaan ku codso [nystateofhealth.ny.gov](https://nystateofhealth.ny.gov)
- Wac Xarunta Adeega Macmiilka 1-855-355-5777
- La kullan caawiyaha qof ahaaneed



Onlayn ka ah  
[nystateofhealth.ny.gov](https://nystateofhealth.ny.gov)



Telefoon ahaan lambarkan  
1-855-355-5777

TTY  
1-800-662-1220



U booqo qof ahaan  
Caawiyaha

Waxaanu ku dhex marin doonaa habka diiwangelinta, ku ogaysiin doon barnaamijka aad u qalanto, iyo marka aad is diiwaangelin doonto. Caawimada waxaa lagu heli karaa luqad kasta oo aad ku hadasho.